FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 19-aad. Garowe .19/8/2017. Lam.8.

**Faafintabilwalbasoobaxda** جريدة الشهرية

*<u>QaybtFaafintaRasmiga ah eeMadaxtooyadaDawladda Puntland</u>*

Qiimuhu waaSh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waaSh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisaSh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaanF.Rhalkiisadariyowixii ka yar waaSh.So 3,000, rukunkaiyo qoritaankawaxaa la waydiistaa qeybta maamulkaFaafinta rasmiga ah. Lacagtawaxaalagubixinayaa xafiiskacanshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**QaybtaKoowaad**

**Ansixinta Xeerka maareyntaiyo maamulka dhul-beereedka puntland.**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

Waxba ma leh

*Xeer LR .3. ee 19/8/2017, kuna saabsan ansixinta Xeerka maareynta iyo maamulka Dhul-beereedka puntland.*

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Xeerka Lr.3. ee20/8/2017, kuna saabsan ansixintaXeerka maareynta iyo maamulka Dhul beereedka puntland.

Madaxweynuhu,

Markuu arkay: DastuurkaDawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: AnsixintaGolahaWakiilada Puntland eeSummad XGGW/DPLS/88/2017 Garowe,Arbaca. Date:16/o8/2017;

Markuu tixgeliyey:Muhiimadda xeerkani u leeyahayDawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

GolahaWakiiladu waxay ansixiyeenXeerka maareynta iyo maamulka Dhul-beereedka puntland.

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa XafiiskaMadaxweynaha, XafiiskaXoghayahaGuud ee Baarlamaanka iyoXafiiskaGaryaqaankaGuud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

DhaqangalkaXeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee DawladdaPuntland..

**Prof Cabdiweli maxamad Cali Gaas.**
**Madaxweynaha Dawladda puntlan**

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

---

*Ref:*-XGGW/DPL/ 88 / 2017 Garoowe, Arbaca Date:- 16/ 08 /2017

Ku:- Madaxweynaha DPL Garoowe

Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Maareynta iyo Maamulka Dhul-beereedka Puntland.

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Dastuurka DPL Qodobka 64-aad Faqrada 1-aad. |
| MARKUU ARKAY: | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref: - **MW/DPS/117/2017** ee **March, 9/2017,** kuna saabsan Ansixin Xeer. |
| MARKUU DHEGEYSTAY: | Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey Kalfadhigii 39-aad fadhigiisii 22-aad ee 10/08/2017, Xeerka Maareynta iyo Maamulka Dhul-beereedka Puntland. |

Wuxuu Guddoomiyey:

Ansixinta Xeerka Maareynta iyo Maamulka Dhul-beereedka Puntland.

Allaa Mahad Leh

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

Tell:- +252 90 7799977, Email: hashi7999@gmail.com, puntlandparliament@gmail.com. www.puntlandparliament.net

DAWLADDA PUNTLAND EE SOMALIYA

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

# Xeerka Maareynta & Maamulka dhul-beereedka Puntland

August. 2017

## Qaybta 1-aad
## HORDHAC

### Qodobka 1-aad
### Magaca iyo Ujeedada Xeerka

1. Xeerka Maareynta & Maamulka dhul-beereedka Puntland

2. Xeerkan waxaa looga gol-leeyahay in lagu abuuro hab-dhaqan wanaagsan ee wax soo saarka beeraha lagu ilaaliyo xuquuqda dhulka iyo dadka.

### Qodobka 2-aad
### Erey Bixin

**Caddeyn**. — Ereyada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa sida soo socota:

B). "**DHUL**" Waxaa loola jeedaa dhul kasta oo wax lagu beero.

T). "**RUQSAD**" Waxaa loola jeedaa ku dhaqan dhulka beeraha muddo go'an.

J). "**SHAHAADO**" Waxaa loola jeedaa warqad lagu caddeynayo xaqa ku dhaqan dhulka.

X)."**XEER NIDAAMIYE DAWLADEED**"Waxaa loola jeedaa Xeer Nidaamiye Dawladeed ee lagu fasiri doono laguna fulin doona Xeerkan.

Kh). "**ISKAASHATO**" Waxaa loola jeedaa Iskaashatooyinka Beeraha oo la Aqoonsan yahay.

### Qodobka 3-aad
### Lahaanshaha Dhul-beereed

Lahaanshaha Dhul-beereedka, iyadoo la tixgelinayo sida uu dhigayo sharcigan dhulka ee Puntland oo lagu dhaqmo ama yaan lagu dhaqmine waxaa iska leh Dawladda.

### Qodobka 4-aad

### Maamulka Dhul-beereed

Maamulka Dhul-beeredka — wasaaradda Beeraha waxay awood u leeyahay kormeeridda dhul beereedka iyadaana mas'uulka ah maamulkiisa sida uu dhigayo sharcigan.

## Qaybta II
## Bixinta Ruqsada Dhul-beereedka (Concession)

### Qodobka 5-aad

### Oggolaansha Ruqsada

1. Oggolaanshaha Ruqsadda. — Wasiirka ayaa awood u leh inuu bixiyo ruqsadda dhulka beeraha siiyana ciddi soo codsata sida Iskaashatooyinka, beeraha, ganacsatada, Dawladaha Hoose iyo Beeraleyda gaarka ah, ha ahaadeen qof keligiis, qoys ama Shirkad; iyadoo la dhowrayo shuruudda lagu tilmaamay Sharcigan.

2. Dhulkii horey loo haystay. —

B) Waa iney ruqsad cusub weydiistaan Wasaaradda Beeraha 12-bilood gudahood.
T). Dhulbeereedka lagu diiwaangelin waayo muddada ku xusan xarafka (B) waa lala wareegayaa.

### Qodobka 6-aad

### Xadka Bixinta Ruqsada

1. Qoys ama qof kasta waxaa la siin karaa hal ruqsad degmadiiba, qof kasta oo samaynsta wakil sharci ah, waxaa la siin karaa ruqsad dhulbeereed isagoo maqan.

2. Qofka, qoyska ama shirkad la siiyey ruqsad dhul-beereed waa inuu dhulbeereedka ku tabcaa mud 6-bilood ah haddii kale ruqsada waa lagala noqonayaa.

3. Qofka muwaadinka ah oo dhul beer ahaan loo siiyey waa mulki uu leeyahay sida sharcigu qabo, shakhsiyaad ama shirkadaha ajnebiga ah waa la siinayaa ruqsad mudadeedu tahay 10-sanno oo la cusboonaysiin karo.

### Qodobka 7-aad
### Xadka uu yeelan karo dhulka la bixinayo

1) Xadka uu yeelanayo dhulka waraabka ah ee ruqsadda lagu bixinayo la siinayo qof ama qoys waxaa weeye 10 hectors, kan qalalanna waa 5 hectors
2) Dadka haysta dhulka badan xadka lagu sheegay qodobkan waxaa loo oggolaanayaa iney sii tabcadaan beeraha muddo1sano ah oo laga billaabo taariikhda uu dhaqan galo Xeerkan.
3) La wareegidda dhulka ka badan xadka loo gooyey, Dhulka ka badan xadka lagu sheegey 1-aad iyo 2-aad ee qodobkan 7-aad waxaa 1sano ka dib markuu dhaqan galo Sharcigan Wasaaradda Beeraha kula wareegeysaa Dekreeto uu soo saaro Wasiirka.

## Qodobka 8-aad
## La wareegidda dhulka danta guud awgeed.

1. Dhulkasta oo beeran ama la beeri jiray waa loola wareegi karaa dan guud awgeed.
2. Habka la wareegidda dhulka danta guud iyo bixinta magdhowga waxaa lagu sheegi doonaa Xeer Nidaamiye Dawladeed.

## Qodobka 9-aad
## Dib u qaybinta dhulka,

1. Dhulka lala wareegey iyadoo la tixgelinayo ee qodobada 9 10,15 sharcigan, waxaa dib loogu qaybinayaa beeraleyda aan dhulka haysan iyo Iskaashatooyinka.
2. Guddiyada wasaarada ee Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka ayaa mas'uul ka ah hawsha ku saabsan dib u qaybinta dhulka.

## Qodobka 10-aad

## Waxyaalaha laga reebayo ruqsadda dhulka.

1) Ruqsadda dhulka lagu bixiyey Sharcigan ee la siiyey qof ama shirkad ajnebi ah waxaa ka reebban in cid kale loo wareejiyo ama laga iibiyo.
2) Ruqsada dhulka la bixiyey sharcigan, waxaa ka reebban beerida waxyaabaha diintu xanibtay.

## Qodobka 11-aad
## Xuquuqda uu leeyahay qofka dhulka falaya

Wuxuu xaq u leeyahay:-

Dhanka waxqabashada:

1) Inuu dhulka beero kana soo saaro khayraadka dhulka ku jira.
2) Inuu beero dhirta waa-weyn (perennialcrops).
3) Inuu ka dhisto guri uu dego iyo dhisma kale oo loogu tala galay tacabka iyo Horumarinta beerta.
4) Inuu dhulka xoolo ku dhaqdo iyo wixii ay xoolahaas u baahan yihiin.
5) Inuu ka qeyb galo Iskaashatooyinka Beeraha isagoo ku darsanaya dhulkiisa.
6) Qofka, qoyska ama iskaashatada muwaadinka ah dhulbeereedka uu ruqsada u haysto wuu iibin karaa, kireyn karaa, hibayn karaa.

## Qodobka 12-aad
## Dhanka Sharciga iyo Dhaqaalaha:
## Xuquuqda sharci ahaan uu yeelanayo qofka xoolo loo siiyey inuu isticmaalo

1. Wax allaale wixii xuquuq ah oo sharcigan u oggol yahay oo ay ka mid yihiin inuu ku intifaaco wixii Khayraad ah oo ka soo baxa isagu yeesho.
2. Inuu xaq u leeyahay inuu daafaco xuquuqdiisa Maxkamadaha ama xafiisiyada kale ee Dawladda hortooda, kana helaayo badbaadiniyo taageero sharci ahaan xaq u leeyahay iyadoon loo kala soocin xagga dhalashada muwaadiniimadiisa, diinta iyo wax alaale wixii u dhow midab takoor.
3. Inuu qiimaheeda deyn kaga qaadan karo Bankiyada Dalka.
4. In lacagta ku baxday beerta iyo wixii la xiriira haddii dibedda ay ka timid, inuu xaq u yeelan karo, in lagu dhaqo sharciga lacag gelinta soo xaq u siinaya in qaar ka mid ah faa' iidada u ka helo beerta inuu dibadda u dirsan karo.

## Qodobka 13-aad
## Waajibaadka saaran qofka dhulka falaya

Qofka dhulka falaya waxaa saaran waajibaadka hoos ku qoran:

1. Inuusan dhulka u isticmaalin si ka duwan shuruudii lagu siiyey.
2. Inuu dhulka u falo sida ugu fiican isagoo kordhinaya barwaaqeynta, kana soo saaraya tacabka ugu badan.
3. Inuu bixiyo canshuurta dhulka ee lagu sheegay sharcigan ama kuwa uu dhigi doono Xeer Nidaamiye Dawladeed.
4. Shuruuda siismada ruqsadda dhulka la falaayo, waxaa lagu lifaaqaya shahaadada dhulka.

## Qodobka 14-aad
## Ka qaadidda ruqsadda (concession)

Waxaa qofka ruqsadda dhulka looga qaadi karaa markii laga helo sababaha soo socda:

1) Markii ay dawladdu dhulka la wareegto sida uu dhigayo qodobka10 ee Sharcigan.
2) Marka qofka dhulka ku dhaqma uu sharcigan ama Xeer Nidaamiyihiisa ku xadgudbo.
3) Marka qofka dhulka ku dhaqma uu ka soo bixi waayo shurudaha lagu siiyey ruqsadda.
4) Marka qofka ruqsadda dhulka dhaxalka u helay uusan rabin inuu beero sida uu dhigayo qodobka 15-aad ee Xeerkan.

5) Marka qofka dhulka ku dhaqma uusan beerin ama uu isaga tago dhulkiisa laba sannadood ka dib markii la siiyey ruqsadda.

6) Waxaa ruqsadda beereed lagu bedeli karaa:-

b) Marka mulkiile wadani ahi uu qof kale ka iibiyo ama u hibeeyo.
t) Marka Dawladdu dhulka qaarkiisa la wareegto sida uu dhigayo qodobka 9-aad.

## Qodobka 15-aad
## Dhaxalka

1) Marka uu dhinto qofka ruqsadda dhulka la siiyey, ruqsadda dhulka waxay ku wareegeysaa dadka dhaxalkiisa xaqa u leh.
2) Markaas oo kale diiwaanka dhulka ayaa lagu dhigayaa magacyada dadka dhaxalka u helay ruqsadda dhulka sida uu dhigayo Sharcigan.
3) Haddii dadka dhaxalka leh aysan rabin inay u beertaan dhulka sida ay dhigeyso shuruudii lagu siiyey ruqsadda dhulka qofkii dhintay, ruqsaddaas waa laga qaadayaa, dhulkana waxaa dib loogu qaybinayaa beeraleyda kale ee meeshaas deggan oo aan dhul haysan. Dadka loo qaybiyey dhulkaas ayaa u mag-dhabaya dadkii laga qaaday wixii kharaj ah ee uga baxay.

## Qaybta III

## Qodobka 16-aad
## Canshuurta iyo Kharajka kale

Bixinta Canshuurta.

1. Qof kasta oo dhulka ku dhaqma waa inuu mar waliba bixiyaa canshuurta dhulka ee Dawladda iyo wixii kale oo canshuur ah ee Dhulka la saaro.
2. Canshuurta dhulbeereedka waxaa lagu jaan-goynayaa cabirka hector-ka.
3. Shuruuda bixinta canshuurta iyo habka lagu bixinayo waxaa lagu sheegi doonaa Xeer Nidaamiye Dawladeed.
4. Kharajka lagu hagaajinayo dhulka, Dhulka ruqsadda lagu bixiyey haddii ay horey u hagaajisay Dawladda, Dawladaha Hoose, kharajka waxaa bixinaya qofkii ruqsadda dhulka la siiyey.

## Qaybta IV

## Qodobka 17-aad
## Diiwaangelin

Diiwaangelinta dhulka.

1) Wasaaradda Beeraha waa inay leedahay diiwaan ku saabsan dhulka beeraha oo lagu qorayo dadka dhulka ku dhaqma magacyadooda iyo shuruuda lagu siiyey ruqsadda dhulka.
2) Wakiilka Degma waliba u jooga Wasaaradda Beeraha wuxuu diiwaan gelinayaa dhulka beeraha ku yaala degmada.
3) Iyadoo la tixgelinayo sharcigan wixii lagu qorayo diiwaanka dhulka waxaa saldhig u noqonaya
4) Ruqsadda dhulka, qoraal rasmi ah ama go'aan Maxkamadeed ee ku saabsan dhulka.
5) Wixii lagu qorayo diiwaanka waa inay oggolaadaan Gudoomiyaha Degmada iyo Kormeeraha Beeraha ee Gobolka.
6) Markii la oggolaaday wixii lagu qoray diiwaanka dhulka, qofka dhulka ku dhaqma waxaa la siinayaa shahaado muujineysa wax allaale wixii ku saabsan dhulka ruqsadda loo siiyey.
7) Wakiilka Wasaaradda Beeraha uu jooga Degmada wuxuu ugu dambeystii u gudbinayaa
8) Wasaaradda Beeraha nuqul ku saabsan waxyaalaha kor lagu sheegay.

## Qodobka 18-aad

## Fiirinta iyo Caddeyn Diiwaanka dhulka.

Cid kasta oo dan u leh wuxuu fiirin karaa diiwaanka dhulka saacadaha ay Xafiisyadu furan yihiin isagoo bixinayaa ajuuradda lagu sheegi doono Xeer Nidaamiyaha, haddii caddeyn qoran ka doonayo in la siiyo.

# Qaybta V

## Qodobka 19-aad

## Wareejinta Awooda

Wareejinta awoodda Wasiirka Wasaaradda Beeraha wuxuu awoodiisa Xeerkani siinayo ku wareejin karaa Madaxa Wasaaradda Beeraha ee Gobollada iyo Degmooyinka.

## Qodobka 20-aad

## Ciqaabta

1. Qof kasta oo ku xadgudba Sharcigaan, waxaa lagu ciqaabayaa xarig dhan laba sannadood ilaa shan sanno ama gannaax lacageed oo u dhigma so. shs.20.000,000 ilaa 30.000,000 ruqsadda dhulka la siiyeyna waa laga qaadayaa.
2. Maxkamaddaha awooda u leh ayaa qaadaya dacwooyinka ku saabsan Xeerkan.

# Qaybta VI

# Qaybta u Dambaysa

## Qodobka 21-aad

## Burin

Waxaa la buriyey Xeer kasta oo ka hor-imaanya ama la socon Karin Xeerkan

## Qodobka 22-ad

## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa Marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**

## LIFAAQA 1-AAD

Jadwalka Canshuurta Shahaadada Rasmiga ah iyo Sanadlaha ee Beeraha

| S/N | Cabirka Dhul-beereedka | Lacagta Shahaadada | Cashuurta Sanadlaha |
|---|---|---|---|
| 1 | 10-20 Hiktar | USD $ 300 | USD $ 100 |
| 2 | 5-10 Hiktar | USD $ 100 | USD $ 50 |
| 3 | 1-5 Hiktar | USD $ 70 | USD $ 30 |

## LIFAAQA 2-AAD

SHAHAADO DHAQMAAD DUL BEEREED

WASAARADA BEERAHA IYO WARAABKA PUNTLAND

XAFIISKA WASIIRKA

Tirsiga Shahaadada:________________

# SHAHAADO DHAQMAAD DHUL BEEREED

MARKAAN ARAGNAY: SHARCIGA tiradiisu tahay **73** ee **21 ka Octoobar 1975**, kuna saabsan dhul bixinta beeraha.

MARKAAN ARAGNAY: Warbixintii Degmada, Gobolka iyo Codsiga ku lammaanan:

Magaca ku dhaqmaha:______________________ اسم الحامل

Mudada dhaqmaadka______________________ مدة الصلاحية:

Tuulada dhulku ku yaal______________________ موقع الارضية(القرية)

Degmada dhulku ku yaal______________________ منطقة الارضية:

Gobolka dhulku ku yaal______________________ محافظة الاقطاعية

Tirade hectaraadka (hectors) ______________________ مساحة الاقطاعية( هيكتر)

Nooca dhulka Waraab/Roob______________________ نوعية الارضية(مسقية وغير مسقية):

Taariikhda dhula la bixiyey______________________ تاريخ تمليك الارضية

Tirada diiwaanka degmada ______________________ رقم التسجيل بديوان المنطقة

Tirada diiwaanka gobolk______________________ ر قم التسجيل بديوان المحافظة

Tirada diiwaanka dhexe ______________________ رقم التسجيل بديوان العام

**SOOHDINTA DHULKA** حدود الارضية

Waqooyi waxaa ka xiga______________________ يقع من جهة الشمال:

Koonfur waxaa ka xiga______________________ يحدّ جنوبا :

Bari waxaa ka xiga______________________ يحدّ شرقا:

Galbeed waxaa ka xiga______________________ يحدّ غربا:

Taariikhda______________________ تاريخ الاصدار

Beerta kor ku magacaaban, waxaa lagu diiwaan geliyay, sharciga lambarkiisu yahay **73** qodobkiisa **19aad** ee soo baxay **21kii Octoobar 1975**,

Laga bilaabo manta oo ay bishu tahay ______________________ beerta kor ku diiwaan gashan, wasaaradu waxay u ogolaatay dhaqmaadkeeda______________________

ENG. CABDULAAHI CALI HIRSI

**WASIIRKA WASAARADA BEERAHA IYO WARAABKA**

# WAAJIBAADKA KU DHAQMAADKA DHUL BEEREEDKA

**Qofka dhul beereedka ku dhaqankiisa codsanaaya waxaa looga baahan yahay fulinta waajibaadka hoos ku qoran:**

1. Dhulka Puntland Allah (SWT) ka sokow waxaa iska leh Dawladda sidaa darteed rahmaad ama dammaanad ma geli karo.
2. Inuusan dhulka u isticmaalin si ka duwan shuruudihi lagu siiyay oo ah ku dhaqmaadka beereed, looma haysan karo dhul sida seere cow-seed IWM.
3. In uu u hoggaansamo habraac siyaasadeed ee dhul beerashada lagu dhaqo.
4. In uu bixiyo canshuurta dhul beereedka dawladda ee Sannadlahaah,sida uu sharcigu waajibinayo, mar walba iyo wixii kale oo canshuur ah ee dhulka la saaro.
5. Ka qaadidda ruqsada ku dhaqmaadka

   Qofka waxaa ruqsadda ku dhaqmaadka looga qaadaya, hadii:

   a) Dawladda dan guud awgeed ugu baahato.

   b) Qofka dhulka ku dhaqmaa hadduusan beerin ama isaga tago dhulkiisa laba sannadood oo isku xiriirsan.

6. In uu ku dhaqmuhu ilaaliyo dabeecadda degaanka oo uu ku kordhiyo geedaha dabayl-celiska.

**CADDEYN:**

Aniga oo ah ku dhaqmaha dhul beereedka ku xusan ruqsadan waxa aan ballan qaadayaa in ka dib markii aan arkay, akhriyeyna ama la ii akhriyey qodobbada kor ku qoran aan fuliyo waajibaadka la i saaray.

**Saxeexa ku dhaqmaha**________________________________